



Casriyeynta Madison



Guudmarka Casriyeynta

Daryta 2021, Dugsiga Sare ee Madison wuxuu dib u furmi isagoo si buuxda u casriyeysan oo ah xarun ku fadhida 292,000 fuudh oo laba jibbaaran oo qaadaysa arday dhan 1,700 oo qof. Dhismaha cusub ee cabbirkiisu ka badan 170,000 fuudh ee laba jibbaaran, oo ay kujiraan laba tiyaatar, meel ardaydu ku kulmaan iyo laba goobood oo jimicsi waxay si aan laga dareemi karin qaabkooda u baddali dhismayaashii casriga ahaa ee qarniga bartamihiiisii. Bii'addan waxbarasho ee cusub ee qarniga 21aad waxa laga heli doonaa ardayda ugu badan ee meelo kala duwan ka soo jeeda ee Portland, kuwaasi oo ku hadla in ka badan 30 luuqadood, waxayna leedahay xarumo, barnaamijyo iyo fursado cusub oo guul abuuraya.

Dugsiga waxa nashqadeeyey iyadoo la adeegsanayo qorshayn iyo nashqadayn sanado badan qaatay kuwaasi oo isku keenay fikradaha boqolaal ah shaqaale, arday, iyo daneeyayaasha bulshada. Tan waxa lagu gaaray kalfadhiyo dhagaysi oo joogto ah, kulamo dadwayne, iyo siminaaro camali ah si loo abuuro kambas dhiirigaliya oo taageera ardayda iyo shaqaalaha tobanaanka sano ee soo socda.



Macluumaadkii U dambeeyay

Website-ka Casriyeynta Madison: <http://MadisonBond.pps>.

Warka Casriyeynta

Kafateeriya / Meelaha Caamka & Waddooyinka

Meelaha caamka ah waxay noqon qalbiga dugsiga casriga ah waxayna noqon meel dadka lagu soo dhaweeyo marka irrida wayn laga soo galo. Waddooyinku waxay isku xiri doonaan dhammaan garabyada waawayn ee dhismaha iyo dhammaan saddex heer ee fasalada.

Garabka Sayniska

Shaybaadhada sayniska waxa lagu xoojin meel u dhaw xagga hore ee dugsiga waxayna muujin inay u yihiin tusaale ifaya dugsiga cusub.

Fanka Jilitaanka

Xarun muusig iyo tiyaar oo cusub, casrina ah ayaa u noqon doonta meel dugsiga iyo bulshada deegaankuna wax ku soo bandhigaan.

Khayraadka Bulshada

Xarunta daryeelka carruurta ah, rugta caafimaadka dadwaynaha, meesha cuntada lagu qaybiyo waxay sii wadi inay u adeegaan bulshada.

Xarumaha Ciyaaraha

Dhisme jimicsi oo gabi ahaanba cusub waxa uu ka koobnaan doonaa 1700 kuraasta jimicsigaa ee waawayn, yaryar, qolka culays qaadista iyo qolka lagdinta/qoob-ka-ciyaaraha. Aagga garoonka waxa kamid noqonaya garoonka kubadda softiboolka lagu ciyaaro.

Waxbarashada Farsamada Mihnadda CTE

Ardayda ku sugan dugsiga dhawaanta la cusboonaysiiyo waxay heli doonaan shaybaaro takhasus oo ku aaddan nashqadda dhijitaalka, injineerinka, robootigga, fanka dhijitaalka, baayomidhikaalka, sanam-qoridda, dhismaha, iyo beeraha adkaysiga leh. Intaa waxa dheer, Saylad cusub oo Dhismaha Barkulanka Teknoolojiyadda ah oo taageeri doonta waxbarashada mashruuc ku salaysan.

Wakhtiga loo qabtay Mashruuca

GU'GA 2016 – GU'GA 2019

Qorsheynta & Naqshadda

Qorshaha Weyn / Qaabeynta Naqshadda
/ Horumarinta Naqshadeynta
/ Dokumentiyada Dhismaha

XAGAAGA 2019 – XAGAAGA 2021

Dhismaha

Bulshada Madison waxay u guuri doontaa Xarunta Marshall kaasi oo loogu talagalay sanad dugsiiyeedyada 2019-20 iyo 2020-21.

DAYRTA 2021

Dugsiga Madison ee sida buuxda loo casriyeeyay ayaa furmaya



Main Gymnasium

Warka Dhismaha

Dhismaha waxa ka hadhsan inuu dhammaado hal sano ka yar. Kambaska la casriyeyey wuxuu leeyihiin muuqaal cusub iyadoo dibadda dhismaha goobta jimicsiga iyo tiyaatarka ay gabogabo ku dhaw yihiin. Hadda shaqada ugu badan waxa u baahan gudaha taasina waxay socon doontaa bilaha soo socda oo dhan. Nidaamyada makaanikaalka iyo dahaarka waxa raacaya nuuradaynta, ranjiyeynta iyo shaqada qurxinta. Gu'ga marka cimiladu soo hagaagto, waxaad arki doonaa shaqada simista dhulka korodha. Wax badan kama harsana wakhtiga aad arki doonto ardayda oo aadaya dugsiga sare ee ugu casrisan Degmada.



Mashruuca Magac-ka-Baddalidda Madison

Madison waa mid kamid ah labada dugsiga sare ee PPS ee kujira shaqada in magaca laga baddalo iyadoo laga jawaabayo tabashooyinka ardayda iyo bulshada ee kusaabsan aaminsanaanta iyo afcaasha cunsurinada madaxwaynayaasha Maraykanka ee ay magacyadooda sitaan. Shaqada waxa bilaabay ardayda Madison kuwaasi oo doonaya magac dugsiga oo in badan waafaqsan qiyamka bulshadooda. Macluumaad dheeraad ah, fadlan raac linkiga [webbeejka Dugsiga Sare ee Madison](#).

BUILDING OUR FUTURE TOGETHER.

<http://MadisonBond.pps.net> • MHSmod@pps.net • Phone: 503-916-2222

www.facebook.com/PPSMadisonHighSchool [@PPSConnect](https://twitter.com/PPSConnect)

Portland Public Schools
School Building Improvement Bond

